



## Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu dhihi jiray labada Sujuudood dhexdooda:"Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabiyow ii dambi dhaaf

Xudayfa Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu dhihi jiray labada Sujuudood dhexdooda:"Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabiyow ii dambi dhaaf".

[Xadiis Saxyix ah] [waxaa wariyey Abuu daawuud,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray markuu fariisto labada Sujuudood dhexdooda: Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabiyow ii dambi dhaaf" wuuna ku cel-celin jiray. Macnaha ii dambi dhaaf: waa baryada Adoonku uu kaga baryayo Rabigii inuu ka masaxo oo ka dhaafo dambiyadiisa kana asturo ceebihiisana.

<https://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/65104>

